

مسارات
خيرية

CHARITABLE
PATHS

June (34) Apr 2024



WAXBARASHADA

HILINKA HORUMARKA IYO KOBACA

BULSHADA





05



HAWLAHA
WAXBARASHADA



03



MASHAARIICDA
BIYAHA IYO
FAYADHOWRKA



06



MASHAARIICDA
ARRIMAHA BULSHADA



07



MASHAARIICDA
ARRIMAHA BULSHADA



Address: Barbera Road - Hargeisa
Mobile: +252633278256
Phone: +252514333
E-Mail:
Website: www.arcsom.org

مسارات
خيرية CHARITABLE
PATHS

WAA DHANBAAL BILLE AH OO
HAYADDA GARGAARKA AFRICA
(A.R.C) AY KAGA WARRANTO
MASHAARIICDEEDA HORUMARINEED
IYO BANI-AADAMNIMO .

JUNE (34) APRIL 2024



جمعية الرحمة العالمية
Rahma International Society



MASHAARIICDA BIYAHA IYO FAYADHOWRKA



CEEL BULSHADU KU RAYSAY OO LAGA HIRGELIYEV KISMAAYO

Kismaayo, Somalia – ARC ayaa xadhigga ka jartay ceelbiyood ay dhowaan ka hirgelisay magaalada Muqdisho ee xarunta dawladgobaleedka Jubaland. Ceelkan oo ku filan baahida biyood ee illaa 400 oo qof maalin kasta, waxaa xadhig ka jaristiisa ka soo qaybgalay masuuliyiin ka socda ARC, iyo hoggaamiyeyaasha bulshada ee deegaanka.

Mudane Cabdiraxmaan Althaamir, madaxa mashaariicda ee ARC oo munaasabadda ka qaybgalay ayaa ka warramay muhiimadda uu ceelkani u leeyahay deegaanka, taas oo ay u horreyso in uu kaalin weyn ka qaadanayo sidii ay bulshada degaankan oo duruufihiisu adag yihiin ay u heli lahaayen biyo nadiif ah.

“Sida ka muuqatay qiimayntii la sameeyey fulinta mashruuca ka hor, waxa ay

bulshada dhibaato ka haysatay helitaanka biyo nadiif ah oo la cabbo, waxa aanay u mari jireen masaafad dheer oo ay ku dhib mudan jireen haweenka iyo carruurta oo ah cidda ugu badan ee bulshada u ciidamisa” ayaa uu yidhi Mudane Thaamir.

Dhinaca kalana dadka deegaanka ayaa farxad ku soo dhoweeyey furitaanka ceelkan, iyaga oo caddeeyey kaalinta muhiimka ah ee uu ka qaadan doono wanaajinta noloshooda.

Mashruucani waxa uu qayb ka yahay Barnaamijka biyaha iyo fayodhowrka (WASH) oo ay ARC ka fuliso deegaanno kala duwan oo ka mid ah dhulka Soomaalida ee gobalka Geeska Afrika, waxaana maalgelisa hay’adda caalamiga ah ee ALRAXMA ee dalka Kuweyt.



MASHAARIICDA DHISMAHA



MASAAJID CUSUB OO LAGA DHISAY HARGEYSA

Hargeysa, Somaliland – Waxaaxadhigga laga jaray masaajidka Saalixah Saharaani oo ay ARC ka hirgelisay magaalada Hargeysa. Masaajidkan oo ay halkii mar ku tukan karaan 116 ruux, waxa uu leeyahay kaabayaasha ay ka mid yihiin kaydka biyaha iyo qasabadaha, qaybta weysada, waxaana loo dhammaystiran gogosha iyo codbaahiyeyaasha.

Masaajidkan waxaa maalgeliyey qoys u dhashay dalka Kuweyt oo soo mariyey

hay'adda caalamiga ah ee ALRAXMA, waxa aanu qayb ka yahay mashaariicda lagu dhiirrigelinayo dhismaha goobaha adeegga dadweynaha si kor loogu qaado iskaashiga iyo isdhexxgalka bulshada isku xaafadda ah, loona xoojiyo amniga.

Masaajidka oo ku yaalla goob aanay Masaajiddo kale ku dhoweyn, ayaa dadka xaafaddu ay bogaadiyeen dhismihiisa.





WAXBARASHADA HILINKA HORUMARKA IYO KOBOCA BULSHADA

Geeska Afrika – Waxbarashadu waa xaq ka mid ah xuquuqda aasaasiga ah ee ay tahay in qof kastaa uu helo, sida u cad qodobka 26 ee ‘baaqa caalamiga ah ee xuquuqda aadanaha’ (The Universal Declaration of Human Rights). Sidaas darteed dal kastaa kama maarmayo in xoogga la saaro, lana maalgeliyo waxbarashada si loo gaadho horumarka uu higsanayo.

Colaadaha iyo masiibooyinka dabiiciga ah, meelaha raadka taban ee ugu weyn ay gaadhsiiyaan waxaa ugu horreeya waxbarashada, sidaas awgeed mar kasta oo laga hadlayo bulsho gargaar iyo kaalmo aadamenimo u baahan, waxaa qasab ah in muhiimad la siiyo waxbarashada.

Hay’adda Gargaarka Afrika (ARC) si loo gaadho yoolkaas weyn, waxa ay dadaal joogto ah ugu jirtaa xoojinta iyo fulinta mashaariicda iyo barnaamijyada la xidhiidha horumarinta waxbarashada ee ay ugu horreeyaan dhismaha dugsiyada iyo xarumaha waxbarashadu. Waxa ay dhistay isla markaana maamushaa xarumo waxbarasho ah kuwa ugu waaweyn ee ka jirta gobalka Geeska Afrika, kuwaas oo ka kooban dugsiyo tiro badan oo ka kooban dhammaan heerarka waxbarashada, laga bilaabo fasallada barbaarinta illaa dugsiya sare, iyo waxbarashada farsamada gacanta iyo xirfad dhiska.

Xarumaha maamusho waxa ay si joogto ah uga shaqaysaa hormarinta iyo sii wanaajinta tayada waxbarashada, iyada oo kaashanaysa dhinacyada ay khusayso iyo bulshada ka faa’idayaanaysa labadaba.

Xarumahaas iyo guud ahaan Barnaamijka waxbarasho ee ay ARC ka waddo dhulka Soomaalida ee gobalka Geeska Afrika, waxaa ka faa’idaysta ardayda agoonta ah, kuwa qoysaskoodu danyarta yihiin, iyo ardayda caadiga ah.

Xarumaha waxbarasho ee ARC ay hirgelisay, gacantana ku leedahay taladooda waxaa ka mid ah ‘Xarunta Kuweytga ee magaalada Hargeysa, Xarunta waxbarashada ee Al-nuur oo Boorama ah, xarunta waxbarashada Alxannaan ee Burco, iyo xarunta waxbarashada ee Laascaanood, Xarunta Sannad ee magaalada Jigjiga ee caasimadda dawlad deegaanka, iyo dugsiyo tiro badan oo ku yaalla deegaanno kala duwan oo gobalka Geeska Afrika ka mid ah.

ARC iyada oo ku qanacsan in mar kasta oo horumar laga hadlayo ay muhiim tahay in marka hore la xuso horumarinta iyo kobcinta waxbarashada, waxaa ka go’an sii wadista dadaal kasta oo lagu rumaynayo riyadaas horumarinta.



تنفيذ مشروع الأضاحي

لجنة أفريقيا للإغاثة
أرض الصومال

1445 هـ 2024 م

Kun Oo Qof Ayaa La Gaadhsiiyey 63 Odxadii Sannadkan

Geeska Afrika – Waxbarashadu waa xaq ka mid ah xuquuqda aasaasiga ah ee ay tahay in qof kastaa uu helo, sida u cad qodobka 26 ee ‘baaqa caalamiga ah ee xuquuqda aadanaha’ (The Universal Declaration of Human Rights). Sidaas darteed dal kastaa kama maarmayo in xoogga la saaro, lana maalgeliyo waxbarashada si loo gaadho horumarka uu higsanayo.

Colaadaha iyo masiibooyinka dabiiciga ah, meelaha raadka taban ee ugu weyn ay gaadhsiiyaan waxaa ugu horreeya waxbarashada, sidaas awgeed mar kasta oo laga hadlayo bulsho gargaar iyo kaalmo aadamenimo u baahan, waxaa qasab ah in muhiimad la siiyo waxbarashada.

Hay’adda Gargaarka Afrika (ARC) si loo gaadho yoolkaas weyn, waxa ay dadaal joogto ah ugu jirtaa xoojinta iyo fulinta mashaariicda iyo barnaamijyada la xidhiidha horumarinta waxbarashada ee ay ugu horreeyaan dhismaha dugsiyada iyo xarumaha waxbarashadu. Waxa ay dhistay isla markaana maamushaa xarumo waxbarasho ah kuwa ugu waaweyn ee ka jirta gobalka Geeska Afrika, kuwaas oo ka kooban dugsiyo tiro badan oo ka kooban dhammaan heerarka waxbarashada, laga bilaabo fasallada barbaarinta illaa dugsiya sare, iyo waxbarashada farsamada gacanta iyo xirfad dhiska.

Xarumaha maamusho waxa ay si joogto ah uga shaqaysaa hormarinta iyo sii wanaajinta tayada waxbarashada, iyada oo kaashanaysa dhinacyada ay khusayso iyo bulshada ka faa’idayaanaysa labadaba.

Xarumahaas iyo guud ahaan Barnaamijka waxbarasho ee ay ARC ka waddo dhulka Soomaalida ee gobalka Geeska Afrika, waxaa ka faa’idaysta ardayda agoonta ah, kuwa qoysaskoodu danyarta yihiin, iyo ardayda caadiga ah.

Xarumaha waxbarasho ee ARC ay hirgelisay, gacantana ku leedahay taladooda waxaa ka mid ah ‘Xarunta Kuweytga ee magaalada Hargeysa, Xarunta waxbarashada ee Al-nuur oo Boorama ah, xarunta waxbarashada Alxannaan ee Burco, iyo xarunta waxbarashada ee Laascaanood, Xarunta Sannad ee magaalada Jigjiga ee caasimadda dawlad deegaanka, iyo dugsiyo tiro badan oo ku yaalla deegaanno kala duwan oo gobalka Geeska Afrika ka mid ah.

ARC iyada oo ku qanacsan in mar kasta oo horumar laga hadlayo ay muhiim tahay in marka hore la xuso horumarinta iyo kobcinta waxbarashada, waxaa ka go’an sii wadista dadaal kasta oo lagu rumaynayo riyadaas horumarinta.

MASHAARIICDA ARRIMAHA BULSHADA



ARC Oo Maalgelisay Ganacsiyo Kala Duwan Sannadkan



Muqdisho, Soomaaliya – Hay'adda Gargaarka Afrika (ARC) oo kaashanaysa hay'adda caalamiga ah ee ALRAXMA Kuweyt ayaa magaalada Muqdisho ka fulisay Mashruuc maalgelin ganacsi. Miisaska iibka khudradda (Booshariga) oo taayirro leh iyo miisaska lagu goglo dharka iibka ah ayaa ay u qaybisay qoysas Soomaaliyeed oo u diyaar ahaa in ay u xoogsadaan sidii ay noloshooda u dabbari lahaayeen.

Mashruucan ayaa qayb ka ah Barnaamijka 'Xoogsi Xalaal ah' ee ay hay'adda ARC ka fuliso deegaannada Soomaalida ee gobalka Geeska Afrika. Waxa aanay ujeeddadiisu tahay in bulshada danyarta ah laga caawiyo ilo dakhli abuur oo ay noloshooda ku maareeyaan, si ay uga maarmaan

ku tiirsanaanta kaalmada dibadda, isla markaana ay kaalin uga qaataan xoojinta meertada dhaqaale ee bulshada.

Sannad kasta kumannaan qof ayaa ka faa'idaysta Barnaamijka oo isugu jira, maalgelin meherado kala duwan, xoolaynta dadka baadiyaha ee xooluhu ka baxaan, iyo waxbarashada farsamada gacanta iyo xirfadaha ee wiilasha iyo Hablaha.

ARC oo kaashanaysa ALRAXMA Kuweyt, siyaasaddeeda barnaamijka waxa ay waafaqsan tahay rumaynta yoolka toddoba iyo tobnaad ee yoolasha qarniga ee Qaramada midoobey dejisay oo ah in horumarka laga dhigo mid waara oo is wadi kara si loo yareeyo ku tiirsanaanta kaalmada bani'aadamnimo.





@africanreliefco



Address: Barbera Road - Hargisa

Mobile: +252633278256

Phone: +252514333

E-Mail: somalia office1@gmail.com

Website: www.arcsom.org

